IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdish0 30 Juunyo 1980 L 1 R 6

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanla Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — djbedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàı wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinavaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

KOOBNIIN

Q A Y B T A **K O O W A A D**

SHARCI

SHARCI L. 21 ee 21 Maajo 1980, Dhismaha Mashruuca H. Beeraha Gobolka Bay.

SHARCI L. 22 ee 28 Juunyo 1980, Heshiis dhexmaray Dawladda JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta I.F.A.D.

Q A Y B T A **L A B A A D**

XEER MADAXWEYNAHA JHS, L. 70 ee 23 Juunyo 1980, Meelmarin Heshiis.

THE PRESIDENT SDR, L. 70 on 23th Jun 1980, Instrument of Ratification.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 71 ee 23 Juunyo 1980, Meel marin Heshiis

DECREE OF TSE PRESIDENT N. 71 on 23th Jun 1980, Instrument of Ratification.

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Cumar Xaaji Siciid Faarax L. 263

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Luul Jaamac Ducaale L. 264

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Maxamed Wardheere Geeseey L. 265

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Caraba Maxamed Geedi L. 266

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Maxamed Geele L. 267

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle L/Xiddigle Cabdi Xasan Guuleed L. 268

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Kaltuuma Cusmaan Aadan L. 269

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Safiya Faarax Ducaale L. 270

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Faaduma Daahir Cilmi L. 271

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Cusmaan Daahir Cabdulle L. 272

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Faadumo Xuseen Maxamed iyo Saaqa Xuseen Maxamed L. 273

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Cali Xuseen Muuse L. 274

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Cabdi Samad Xalane L. 275

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Jibriil Caris L. 276

WASAARADDA H. GUUD, 18. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Xasan Maxamed Kaarshe L. 277

WASAARADDA H. GUUD, 15. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Xasan Gaa'id Cali L. 278

WASAARADDA H. GUUD, 15. 6. 1980, Naado Dhul Jaalle Xaliima Maxamed Cabddow L. 279

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE 27.4.1980 Lumid Buug Kayd L. 1652 L. 280

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 9. 5. 1980 Lumid Jeeg wareega L. 023656 L. 281

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.5.1980 Lumid Buug Kayd L. 9915 L. 282

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.6.1980 Lumid Buug Kayd L. 15088 L. 283

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 16.6.1980, Lumid Jeeg War. L. 29400à L. 284

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 28.6.1980, Lumid Buug Kayd L. 8699 L. 285

MAXKAMADDA G. BANAADIR Jeega Wareega Lamb. 034555 L. 287

MAXKAMADDA G. BANAADIR Jeega Wareega Lambar 38373 L. 288

SHARCI L. 21 ee 21 Maajo 1980 Dhismaha Mashruuca Horumarinta Beeraha Gobolka Bay

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Qod. 72, 78 iyo 111 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya,

ISAGOO ARKAY : Soo jeedinta Mashruuca Sharci ee Golaha Wasiirada;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

(DHISMAHA MASHRUUCA)

1) Waxaa halkan lagu dhisayaa Mashruuca Horumarinta Beeraha Gobolka Bay.

2) Mashruuca wuxuu yahay mid madax banaan oo awood iyo jirid qaanuuni ah leh.

3) Mashruucu wuxuu hoos imaanayaa Wasaaradda Beeraha.

QODOBKA 2AAD

(XARUNTA MASHRUUCA)

Xarunta Mashruucu waxay ahaan doontaa Baydhoba, magaalo madaxda Gobolka Bay.

QODOBKA 3AAD

(UJEEDOOYINKA MASHRUUCA)

UJEEDOOYINKA MASHRUUCA WAA :

1) Horumarinta Guud ee tacabka beeraha iyo xanaanada xoolaha ee Gobolka Bay;
2) Horumarinta Biyaha ee Gobolka;
3) Hagaajinta iyo samaynta waddooyinka ee Gobolka;

4) Horumarinta Daaqa ee Gobolka;

5) Horumarinta Caafimaadka Xoolaha ee Gobolka;

6) Fidinta aqoonta beeraha, tababarrada beeraaleeyda, tijaabada beeraha iyo tan daaqa ee Gobolka

7) Tabarrida iyo kor u qaadidda aqoonta iyo waayo aragnimada shaqaalaha beeraha ee Gobolka;

8) Abuuridda kaader Soomaaliyeed oo maamula Mashaariicda Horumarinta Beeraha iyo Xoolaha;

9) Fulinta heshiisyada caalamiga ah ee dhexmara ururrada maalgelinta Mashruuca oo ay ka mid yihiin: IBRD (IDA), IFAD, IDB, ADF iyo USAID.

QOOBKA 4AAD

*(***LAA*M*AHA *M*ASHRUUCA***)***

A) Laamaha Mashruuca waxay ka kooban yihiin kuwo ka dhisan Gobolka Bay oo kala ah :

1) Laanta Horumarinta Biyaha ee Wakaaladda Horumarinta Biyaha ee Gobolka Bay;

2) Laanta Waddooyinka ee Wasaaradda Howlaha Guud ee Gobolka Bay;

3) Laanta Daaqa ee Wakaaladda Daaqa Qaraanka ee Gobolka Bay;

4) Laanta Caafimaadka Xoolaha ee Wasaaradda Xanaanada Xoolaha; Dhirta iyo Daaqa ee Gobolka Bay;

5) Laamaha Wasaaradda Beeraha oo dhan ee Gobolka Bay

B) Xuquuqda iyo waajibaadka qaanuuniga ah ee shaqaalaha Laamaha xubnaha sare ku xusan waxaa dhamaan lagu wareejinayaa Mashruuca.

QODOBKA 5AAD

AWOODDA MASHRUUCA

1) Mashruuca wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeedooyinka ku xusan qod. 3aad ee Sharcigan.

2) Mashruucu wuxuu la wareegayaa oo hoos imaanayaa awoodii iyo howlihii laamaha ku xusan qod. 4aad ee Sharcigan.

3) Wareejinta awoodda iyo howlaha laamahaasi waxay bilaabanayaan marka mashruucu uu rasmi ahaan u hirgalo (Project effectivenes)

QODOBKA 6AAD

(HIRGELINTA MASHRUUCA)

Hirgelinta Mashruuca waxaa ka mas'uul ah :

1) Wasiirka Wasaaradda Beeraha oo masuul ka ah dejinta siyaasadda guud ee mashruuca lagu maamulaayo, isagoo tixgelinaayo ujeedooyinka guud ee Mashruuca iyo talada Guddiga Isuduwidda ee ku xusan qod. 7aad ee Sharcigan.

2) Wasiirku wuxuu talo ka bixinayaa magacaabidda Madaxda Mashruuca wuxuuna leeyahay awood kormeer.

QODOBKA 7AAD

(AWOODDA MAAREEYAHA GUUD)

Maareeyaha Guud ee Mashruucu wuxuu mas'uul ka yahay :

a) Fulinta ujeedooyinka Mashruuca

b) Maamulka Guud.

t) qoridda, asluubta iyo daryeelka shaqaalaha

j) Maamulka Lacagta

x) Saxiixa heshiisyada Mashruucu dhinac ka yahay isagoo la tashanaaya Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

QODOBKA 8AAD

Maareeynta Mashruucu waxay ka kooban tahay :

1) Maareeyaha Guud ee Mashruuca

2) Maareeye ku Xigeen Guud ee Mashruuca

3) Maareeyaha Waaxda Farsamada iyo kan Maamulka Lacagta

QODOBKA 9AAD

(**Magac*aabi*dda *Ma*d*ax*da *Mashruuca*)

Maareeyaha Guud, Maareeye ku Xigeenka Guud iyo Maareeyayaasha waaxyaha waxaa lagu magacaabayaa Dekreeto Madaxweyne, isagoo dhegeystay Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

QODOBKA 10AAD

A) Guddiga Isuduwidda ee Mashruuca wuxuu ka kooban yahay :

1) Wasiirka Wasaaradda Beeraha	Guddoomiye
2) Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta Qaran	Xubin
3) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda	Xubin
4) Wasiirka Wasaaradda Xan. Xoolaha, Dhirta & Daaqa	Xubin
5) Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha	Xubin
6) Wasiirka Wasaaradda Howlaha Guud	Xubin
7) Xoghayaha Xisbiga ee Gobolka Bay	Xubin
8) Maareeynta Guud ee Mashruuca	Xubin

B) Guddiga Isuduwidda ee Mashruucu wuxuu mas'uul ka yahay siyaasadda iyo qorshaha sare ee mashruuca iyo hubinta hirgelinta Mashruuca.

T) Guddiga waxay kulmaayaan sanadkiiba mar, hase yeeshee waxay yeelan karaan fadhiyo aan caadi ahayn, haddii loo baahdo.

QODOBKA 11AAD

(SHAQAALAHA)

1) Mashruucu wuxuu qoran karaa shaqaale Soomaaliyeed ee uu u baahan yahay, isagoo raacaaya sharciga qoridda shaqaalaha.

2) Mashruucu wuxuu awood u leeyahay inuu dibadda ka keeno khubaro ajnabi ah, haddii loo baahdo, isagoo raacaaya sharciyada Dalka iyo oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

QODOBKA 12AAD

(HESHIISYADA)

1) Heshiisyada dhexmara Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Ururrada caalamiga ah ee maalgelinta Mashruuca oo ay ka mid yihiin: IBRD (IDA), IFAD, ADF, iyo USAID waxay ka mid yihiin sharcigan.

2) Heshiisyadaas oo ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS

QODOBKA 13AAD

1) Qodobka 5aad ee Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka mashruucu uu si rasmi ahaan ah u dhaqan galo.

2) Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S.

Muqdisho, 21 Maajo 1980

MADAXWEYNAHA J. *D.* S.

JAALLE MOHAMED SIYAAD BARRE

SHARCI L. 22 ee 28 Juunyo 1980 Heshiis Dhexmaray Dawladda JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta I.F.A.D.

Madaxweynaha JDS,

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Qod. 78 (1) iyo 82 (4) iyo 67 (5);

IYADOO SALDHIG : Looga dhigaayo oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga *soo socda :*

QODOBKA 1AAD

1) Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha (IFAD) oo ay xarunteedu tahay Magaaladda Roma (Italia) kuna saabsanaa Amaah Lacageed oo ay Lacagteedu dhan tahay SDR 6,250,000/= looguna talo galay Maalgelinta Mashruuca Horumarinta Gobolka Bay.

2) Heshiiskaa waxaa lagu kala saxiixday Magaaladda Muqdisho taariikhda markay ahayd 8 Jennaayo 1980.

3) Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo lifaaq u yahay.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan Heshiiska Qod. 1aad ee sharcigan lagu soo tilmaamay, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo xeerarka Dalka, dhaqaangelintiisuna waxaa la waafijinayaa qod. 72 (1) aad ee Dastuurka JDS iyo qodobada saameeya ee isla Heshiiska.

QODOBKA 3AAD)

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada iyo Xeerarka Dalka wuxuuna dhaqan galayaa maalinta ku xigta oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S.

Muqdisho, 28 bJuun 1980

S/*GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE*

***MADAXWEYNAHA* J. *D.* S.**

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 70 22 Juunyo 1980 Meelmarin Heshiis

JAMMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Qod 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee Mashruuca Horumarinta Beeraha Gobolka Bay ee dhexmaray Dawladda Jamhuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya iyo sanduupa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha (IFAD), laguna kala saxiixday Magaalada Roma 4tii Jannaayo, 1980.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska aan sheegin taariikhdiisuna ahayd 5. 6. 1980. Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska Amaahda ee Mashruuca Horumarinta Beeraha Gobolka Bay ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha (IFAD), laguna kala saxiixday magaalada Rome 4tii Janaayo, 1980, waa la meelmariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci, wuxuuna dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 22 6. 1980

SAREEYE GASS MAXAMED SIYAAD BARRE
MADAXWEYNAHA
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

DECREE OF THE PRESIDENT SOMALI REP. DEMOCRATIC N. 70 on 28 Jun 1980, Instrument of Retification :

HAVING SENN : Article 67 para 5, Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN : The Loan Agreement for the Bay Region Agricultural Development Project between the Government of the Somali Democratic Republic and the Insternational Fund for Agricultural Development (IFAD), signed at Rome on 4th Janaury, 1980.

TAKING NOTE : Of the approval of the People's Assembly of the said Agreement dated 5th June, 1980.

Hereby promulgates the following law :-

ARTICLE 1

The Loan Agreement for the Bay Region Agricultural Development Project between the Government of the Somali Democratic Republic and the International Fund for Agricultural Development (IFAD), signed at Rome on 4th Janaury, 1980, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

This Law shall be published in the Official Bulletin of the Government.

MAJOR GENERAL MOHAMED **SIAD** *BARRE*

PRESINDENT *OF THE*

SOMALI *DEMOCRATIC REPUBLIC*

Mogadishu, 22. 6. 1980

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 71 ee 23 Juunyo 1980 Meelmarin heshiis

ISAGOO ARKAY : Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda lamb. 972 - So ee Mashruuca Horumarinta Beeraha Gobolka Bay ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) laguna kala saxiixday Degmada Kolombiya ee dalka Maraykanka 26kii Maarso, 1980.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska aan soo sheegnay taariikhdiisuna ahayd 23.6.80 Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska Amaahda lamb. 972 - So ee Mashruuca Horumarinta Beeraha ee Gobolka Bay dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) laguna kala saxiixday Degmada Kolombiya ee dalka Maraykana 26kii Maarso, 1980, waa la meel mariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Sharcigaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23. 6. 1980

SAR*EEYE* GAAS *MAXAMED SIY*AAD *BARRE*

MADAXWEYNAHA

Jamhuuriy*adda *Dimoqraad*iga *Soomaaliya

DECREE OF THE PRESIDENT SOMALI DEM. REP. N. 71 on 23th Jun 1980 Instrument of Ratification:

HAVING SEEN : Article 67 para 5, Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN : The Loan Agreement No. 972 - So for the Bay Region Agricultural Development Project between the Government of the Somali Democratic Republic and the International Development Association, signed in the Distric of Columbia, USA, on 26th March, 1980.

TAKING NOTE : Of the approval of the People's Assembly of the said Agreement dated 23rd June, 1980.

ARTICLE I

The Loan Agreement No. 972 - So for the Bay Region Agricultural DevelopmentProject between the Government of the Somali Democratic Republic and he International Development Association (IDA), signed in the District of Columbia, USA, on 26th March, 1980, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have the force of Law in the territory of theSomali Democratic Republic and shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

This Law shall be published in the Official Bulletin of the Government.

Mogadishu, 23. 6. 1980

SOMALI DEMOCATIC REPUBLIC

PRESIDENT OF THE

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Xaaji Siciid Faarax uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 17.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Retangolare Addimihiisuna yihiin 50X100 kuna fadhiya 5000 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Dowladeed

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul dad leeyahay

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed

B A R I waxaa ka xiga : Wadada Balcad

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 263

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Luul Jaamac Ducaale ay u soo qorotay arji Waaxda Sahaanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 6.6.79 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqsho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Retangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN *SIDA HOOS KU QORAN*

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 19 M

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 23 M

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0567

B A R I waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

***XAAJI MAXAMED* MAYE**

L. 264

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Wardheere Geeseey uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2. 1. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0457 Y

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb 0454 Y

B A R I waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0458 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho 18 Jun. 1980

K/S Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleyta
Xaaji Maxamed Maye

L. 265

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
N A A D D O D H U L

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caraba Maxamed Geeddi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20. 6. 80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiiscu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 143 By.

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 141 By.

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 135 By.

B A R I Waxaa ka xiga : Waddada Balcad

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 266

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA *IYO* DEGAANKA *MAGAALAYNTA*

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulaahi Maxamed Geelle uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu hayd 7. 12. 78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA *YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN*

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb 0576 Y

Koonfur waxaa ka xiga : WADDO

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb 0573 M

B A R I waxaa ka xiga : J I D

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S* AGAAS*IMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

***XAAJI MAXAMED* MAYE**

L. 267

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa lac addeynayaa in Jaalle Laba Xiddigle Cabdi Xasan Guuleed, uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 14. 2. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb 0570 Y

Knfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 20 Y

B A R I waxaa ka xiga : Dhul Lamb 0567 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho 18. Guunyo 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

Xaaji Maxamed Maye

L, 268

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Kaltuuma Cusmaan Aadan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 9. 11. 1978 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 2170 Y

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb 2173 Y

B A R I waxaa ka xiga : Dhul Lamb 2169 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA
XAAJI MAXAMED MAYE

L. 269

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Safiya Faarax Ducaale uu u soo qortay arji Waaxda Sahanaka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu hayd 3.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb 338 W

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 339 W

B A R I waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 270

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Daahir Cilmi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanaka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 14 10. 1979 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 60 B
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 56 B
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb 57 B
B A R I waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S **AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA**

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 271

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cusmaan Daahir Cabdule uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5. 9. 1979 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb 315 W

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B A R I waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 319 W

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

K/S **AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA**

XAAJI MAXAMED MAYE

Muqdisho, 18. 6. 1980

L 272

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Xuseen Maxamed iyo Saaqa Xuseen Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 4. 6. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Lotto lamb. 35 B

Galbeed waxaa ka xiga Lotto Lamb. 34 B

Bari waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980
K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 273

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Xuseen Muuse uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 10. 2. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 879 M

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B A R I waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 882 M

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 274

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Samad Xalane Afdhub uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 31. 3. 1979 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu waa Regtangolar Addimhiisunayihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 249 W

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 233 W

Galbeed waxaa ka xiga : J I D

B A R I waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 240 W

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA
XAAJI MAXAMED MAYE

L. 275

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Jibriil Caris uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta eeW. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 21. 2. 1977 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihii suna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN *SIDA HOOS KU QORAN*

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 64 M

Koonfur waxaa ka xiga : Jid

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 85 M

B A R I waxaa ka xiga J I D

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 276

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Maxamed Kaarshe uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd1. 3.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo uu yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0580 Y

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0577 Y

B A R I waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0581 Y

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Gaaid Cali uu u Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 18. 6. 1980

K/S **AGAAS*IMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA***

XAAJI MAXAMED MAYE

L. 277

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA
N A A *D O* D *H* U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Gaa'id Cali uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaalaynta ee W. H. Guud maalintii bishu ahayd 5.5.80 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye Qaabkiisu waa (Afargeesle (Quadrato) addimihiisuna waa 24; 24; 24; 2b; kuna fadhiya 576/- Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi waxaa ka xiga : Xaliima Moxamed Cabdow
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
B a r i waxaa kaxiga : Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo yaal Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaalaynta ee W.H.G. Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Marka 15.6.1980.

8gaasimaha Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag.
Cabdi Maxamed Cumar

L, 278

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaliima Maxamed Cabddow uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W H. Guud maalintii bishu ahayd 5. 5. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye Qaabkiisu waa Afar geesle (Quadrato) addimihiisuna waa 24: 24: 24: 24 kuna fadhiya 576 Mdh

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul banaan oo dad leh

Koonfur waxaa ka xiga : Xasan Gaaid Cali

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B A R I waxaa ka xiga : Waddo

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Marka, 15 Juunyo 1980

K/S **AGAAS*IMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALENYNTA***

***XAAJI MAXAMED* MAYE**

L. 279

MAXKAMADDA GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE MARKA

UJEEDDO : Buug Kayd Lamb. 1652.

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Sh. Hoose, Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur;

HADDUU ARKAY : Dacwadda Horay loo soo qoray :

HADDU ARKAY : Waxa ay ku saabsan tahay, arkay Ogeysiiskii bankiga (eeg) warqadda Bankiga ganacsiga iyo Keydka Laanta Afgooye

WUXUU OGAADAY INEEY TAHAY SHAQADIISA

HADDU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. yahay 2 ee 9.9.1965

WUXUU CADDEYNAYAA

In Buugga Kaydka ee Lamb. 1652, oo ay ku qorantahay Sh. So. 13.450 (toban iyo Seddax kun afar boqol iyo Konton) iskana leedahay Khadiijo Shariif Xasan

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo buugga Keydka ee Cusub Qofka kor ku magacaaban 15 (shan iyo toban maalmood) kedib markii amarkaan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda :

WUXUU CODSANAYAA

In Buugga Kaydka oo loo sameey doono Gacanta laga saaro Khadiijo Shariif Xasan, ama qof iyada ka sita Wakaalad Sharci ah iyadoo la sugayo 15 maalmood.

Marka : 27. 4. 1980;

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOB. SH. HOOSE

Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur

KAALIYAHA MAXKAMADDA

Cali Siyaad Rooble

L. 280

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDU AKHRIYEY: dacwadda kor ku qoran;

HADDU HUBSADAY: In Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 023656, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 7000 uu iska lahaa Nuur Diinle Maxamed sida ku cad warqadda lamb. 3617, Taariikh 8. 7. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad

HADDU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. yahay 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeeg Wareeg Lamb. 023656, oo ku qoran Magaca Nuur Diinle Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 7000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 1aad u beddelo Nuur Diinle Maxamed (Jeegga war.) ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 9 Maajo 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 281

MAXKAMADDA GBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : In Buug Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 9915,lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 1.110 uu iska lahaa Cabdulqaadir Sheekh Maxamed sida ku cad warqadda lamb. 798 Taariikh 19.5.80 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADDU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. yahay 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keydka) Lamb 9915. oo ku qoran Magaca Cabdulqaadir Sheekh Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 1.110.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad u beddelo Cabdulqaadir Sheekh Maxamed Xasan (buuga Keydka) ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood, maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 19. 5. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GBOLOKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in Buuga Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 15088 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 1100 uu iska lahaa Daahir Diiriye Wacays sida ku cad warqadda lamb. 3732 taariikh 10. 6. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. yahay 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Kaydka) lamb. 15088 oo ku qoran Magaca Daahir Diiriye Wacays ayna ku jirto Sh. So. 1.100

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u beddelo Daahir Diiriye Wacays buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 14. 6. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 283

MAXKAMADDA GBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : In Jooga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 294006 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 10.478 uu iska lahaa Shirkadda Ganacsiga ee Jeegaan sida ku cad warqadda lamb. 00582 taariikhdu 29. 5. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 5aad.

HADDU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. yahay 2 ee 9.9.1

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Jeega Wareega) lamb. 294006, oo ku qoran Magaca Shirkadda Ganacsiga ee Jeegaan ayna ku jirto Sh. So. 10.478

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta (5aad) u beddelo Shirkadda Ganacsiga ee Jeegga wareegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah a dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 16 6. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 284

MAXKAMADDA GBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 8699. lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 2.050 uu iska lahaa Caasha Xaaji Warsame sida ku cad warqadda lamb. taariikhdu 28. 6. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

HADDUU ARKAY : qod. 69 sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keydka) lamb 8699 oo ku qoran Magaca Caasha Xaaji Warsame ayna ku jirto Sh. So. 2.050

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Dhexe u beddelo Caasha Xaaji Warsame buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood, maalinta go'aana lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 28.6.1980

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BENAADIR

L. 285

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. DHEXE Jowhar

20. 4. 1980 Lumid Buug Kayd L. 78 L. 286

MAXKAMADDA GOBOLKA *SH.* DHEXE

UJEEDDO : Cusbiineysiin Buug Lamb. 78:
Garsooraha Maxkamadda Gobolka Shabeelaha Dhexe

HADDUU ARKAY : Dacwadda uu soo qortay Jaalle Jaamac Cawaale Abtidoon oo 47 jir ah Degan Balcad, kuna soo xusay in taariikhdu markay ahayd, 78 kuna qorneed Sh. So. 10,000 (toban kun) Shillin.

HADDUU ARKAY : Digniintii Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ee Laanta labaad (eeg warq lamb. 2 ee 9. 2. 1980

HADDU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. yahay 2 ee 9.9.1965 wuxuuna ogaaday in ay tahay Shaqadiisa.

WUXUU *CADAYNAYAA*

Lumidda Buugga Kaydka ee lamb. 78, kuna qoreed lacag dhan Sh. So. 10.000 (tobankun) shillin iskana lahaa Jaalle Jaamac Cawaale Abtidoon sida ku cad isla warqadda Bangiga ee kor ku tilmaaman.

WUXUU *AMRAYAA*

In loo Sameeyo Buugga Kaydka cusub badelkii ka lumay ninka magaciisa aan kor ku soo xusnay 15 beri kaddib markii Dekereetadan lagu Sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda

WAXAANA LA *CODSANAYAA*

In Buugga la sameyn doona gacanta laga saaro Jaalle Jaamac Cawaale Abtidoon, ama qof isaga a sita Wakaalad sharci ah iyadoo la sugayo Mudada 30 maalmood ah ee kor lagu soo sheegay.

Sheekh *Cusmaan* Sheekh Xuseen *Maxamuud*

(*Garsooraha Maxkamada Gobolka Sh. Dhexe*

L. 286

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY : dacwadda kor.ku qoran;

HADDUU HUBSADAY in Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 034555. Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 8.200/ uu iska lahaa Abuukar Xaaji Maxamed sida ku cad warqadda lamb. ———————— Taariikh oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

HADDUU 'ARKAY : qod 69 sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 034555 oo ku qoran Magaca Abuukar Xaaji Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 8.200

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Dhexe u beddelo Abuukar Xaaji Maxamed Jeeg Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 7. 5. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in Jeega Wareega dhumay oo lambar kiisu ahaa 38373. Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 3.800 uu iska lahaa Abuukar Xaaji Maxamed sida ku cad warqadda lamb. ——— Taariikh oo bangiga Ganac. iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY : qod 69 sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 38373 oo ku qoran Magaca Abuukar Xaaji Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 3.800

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u beddelo Abuukar Xaaji Maxamed Jeeg Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 7. 5. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed **Maax**